



UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 02/08/2025, Anigoo ah Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- ZAINAB OMAR ALI, Hooyo: Faadumo Cabdulqaadir Cabdi, Somali ah, Ku Dhalatay: Ijara, Sanadkii: 10-10-1991, Sidata ID, Lr. 845376455

LA WAKIISHE:- HAWO OMAR ALI, Hooyo: Faadumo Cabdulqaadir Cabdi, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01-01-1979, Degan Kaxda, Sidata Somali Passport, Lr. P01599457

TILMAAMAHA NUS-BOOSKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Kaxda)**, Cabirka: **(20X10-Mt)-M**, Looto No: **935-B**, W.M.L: **(Rep.No.2882/NH/18)**, Tr. **25/01/2018**, Kana Soo Baxay Nootaayo Hilaac, Uuna Saxiixay Dr.Deeq Cabdi Rayid

SOOHDINTA NUS-BOOSKA

Bari: dhul dad, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: **jid**

B- Aniga oo ah **ZAINAB OMAR ALI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaashey **HAWO OMAR ALI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Nus booska Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in Nus booskaas ay gadi karto, Wareejin Karto, Hibeyn karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uguna doodi karto Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **HAWO OMAR ALI** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Nus booskaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **HAWO OMAR ALI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay Walaashey **ZAINAB OMAR ALI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

ZAINAB OMAR ALI

Zeynab

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

HAWO OMAR ALI

Korawo

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDULLAHI ABDIRIZACK JAMA

2- ABDULLAHI ABDIRAHMAN ADEN

Abdullahi

Aden


(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1716/T.P.N/25, Tr. 02/08/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **ZAINAB OMAR ALI** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **HAWO OMAR ALI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: ABDULL

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



XAFIISKA LATALINTA ARIMAHA
SHARCIGA & SUGITANKA HESHIISYADA
EE NOOTAAYADA HILAAC
Mogadishu - Somalia



مكتب الهلال

XAFIISKA NOOTAAYADA HILAAC EE DR. DEEQ CABDI RAYID

وتوثيق العقود

25 JAN 2018

مقديشو - الصومال

The Office Of Consulting Legal
Affairs & securing Agreement of the Ministry

COPY
MOGADISHU - SOMALIA

Rep.no. 2882/NH/18

DATE:25/1/2018

UJEEDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN OO NUS BOOS AH.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 25/1/2018, anigoo ah: **Caasho Sh.Abuukar Mayow**, 29 Jir ah Soomaali ah Hooyadeyna layiraahdo **Saynab Cismaan Cali**, ku dhashay Xamar Dagan Xamar xiskeyguna taam yahay cid igu qasbeysana aysan jirin, sawirkayguuna kor ku dhagan yahay ahna milkiilaha rasmiga ah ee dhulka hoos ku qoran, waxaan qoraalkan ku cadeynayaa inaan ka iibiyey kuna wareejiyey **Saynab Cumar Cali**, 30 Jir ah Hooyadeedna la yiraahdo **Faadumo C/qaadir Cabdi**, ku dhalatay Jilib Dagan Xamar-Dharkaynleey Dhul dhan **NUS BOOS, 20x10-B Loto Lam.935-B₂** Kuna Yaala dagmada Kaxda Soohdin tiisuna tahay sidaan soo socota: **Galbeed : Dhul Dad, Bari: Dhul Dad , Konfur : Dhul Dad, Waqooyi: Jid**, anigoo ah: **Caasho Sh.Abuukar Mayow** waxaan dhulka ku milkiyey **Beeca Rep No.2158/NH/17 Tr.29/8/2017** Kana soo Baxday XAFIISKA NOOTAAYADA HILAAC UUNA KU SAXIIXAN YAHAY **Dr.Deeq Cabdi Rayid**, isla markaana waxaan **NUS BOOS** ka gaday kuna wareejiyey **Saynab Cumar Cali**, waxaana Kaga gaday lacag dhan **\$4300 (Afar Kun Iyo sadex Boqol oo doolarka mareykanka ah)**. Lacagtaas dhamaanteed Waan qatay Aniga oo qanacsan Nootaayada horteeda. Waxaana damiinu aqoonsi ka ah : **Cabdi Cali Maxamed, Lehna Kaarka aqoonsiga Lambarkiisu yahay 27903027421880** ee ku dhagan dhabarka danbe ee warqadan Hadaba waxaan cadeynayaa anigoo ah milkiilaha, in dhulkaas aan wareejiyey uu ka madax banaanyahay dayn, rahan iyo xuquuq dad-kale, wixii dhib ah ama sharci duris ah, amase ceebaal iyo sheegasho dad kale ah, ee ka yimaada milkiyada dhulkaas waxaa mas'uul buuxa ka ah anigoo ah : **Caasho Sh.Abuukar Mayow** isla markaana iibsadaha Dhulka **Saynab Cumar Cali**, way aqbashay beecan Nootaayada horteeda.

Saxiixa iska iibiyaha

Caasho Sh.Abuukar Mayow

Saxiixa damiinu aqoonsiga

Cabdi Cali Maxamed

Saxiixa Iibsadaha

Saynab Cumar Cali

Saxiixa Markhaatiyaasha

Cabdi Barre Gaws

Cismaan C/Ilaahi Cabdi

Jimcaale Cali Maxamed

Sugitaanka Nootaayada

Anigoo ah **Dr.Deeq Cabdi Rayid**, leh-na xafiis nootaayo ku yaala Degmada Kaxda, gaar ahaan Bakhaarada, waxaan halkan ku cadeynayaa in heshiiskan kor ku xusan ee kala gadashada **NUS BOOS** bannaan uu yahay mid sax ah, waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Isla markaana ay saxiixeen dhinacyada heshiiskani quseeyo, Nootaayada **Hillaac-na** waxay hubisay in magacyadaas ay yihiin kani dhabta ahaa ee lahaa saxiixyada kor kuxusan.Laguna qoray diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYADA

Dr.Deeq Cabdi Rayid

(Signature of Dr. Deeq Cabdi Rayid)



HILLAAC NOTARY OFFICE

Tel: +252-61-8009998/ +252-61-5536036/ +252-69-9963333/ +252-69-5536036




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 06/08/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Xaawo Cumar Cali** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1716/T.P.N/25, Tr. 02/08/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Xaawo Cumar Cali
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	2010-M
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada KAXDA
Lotto Lambar	935-B
W.M.L	1882/NH/18, Tr. 30/11/-0001 Ka soo baxday Nootaayo Hilaac
Taariikhda Wakaalada	02/08/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Xaawo Cumar Cali**, Leh Tel No. **0618938869**, Degan **Kaxda** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Xaawo Cumar Cali

Xaawo Cumar Cali